



December 24, 2023

Go'aankii Issimada SSC-Khaatumo iyo Saamaynta Dastuurka iyo Doorashooyinka Puntland

Mudanayaal iyo Marwooyin,

Go'aankii masiiriga ahaa ee ay qaateen Issimada reer SSC-Khatumo wuxuu samayn weyn ku yeelanayaa Dastuurka Puntland, deegaamada iyo xuduudaha Puntland, matalaada xubnaha baarlamaan, jagooyinka maamulka ugu sareeya iyo wadajirkii bulsho ee reer Puntland.

Go'aankaasi wuxuu ku soo beegmay wakhti xasaasi ah oo doorasho loo dhaqaaqayn, Puntlandna ay weli kasoo kabanayso rabashadihii dhacay iyo ismaandhaafkii iyo hubanti la'aantii siyaasadeed.

Maadaama baarlamaankii Puntland uu xiligiisii dhamaaday, Madaxweynihii xukuumaduna uu mashurax yahay, ka sharci ahaan way adag tahay in Dowlada hada jirta ay keligeed ka jawaab celiso go'aanka Issimada reer SSC-Khaatumo.

Sidoo kale, maadaama go'aankaani uu saamayn toos ah ku yeelanayo qaabka doorashada hada socota u dhacayso, isbedelna ku yimid xubnihii 66-ka ahaa ee dastuuri ahaan ay ahaydna in doorashada lagu galo waxaan soo jeedinaynaa sida:

- In maadaama aan weli kasoo kabanayno shaqaaqooyinkii siyaasadeed ee dad ku naf waayeen iyo hubanti la'aantii siyaasadeed, aan la furin doodo ama la qaadin talaabooyin dib u abuuri kara is afgaranwaa siyaasadeed iyo kala aragti duwanaansho dhib cusub horseeda,
- In maadaama howshii doorashooyinka meel fiican marayaan aan dib looga noqon go'aankii qabsoomida doorashadaan, mudadii loo qabtayna ay ku dhacdo,
- In doorashooyinka ka dib isla tashi bulsho oo xukuumada cusub hogaanka u hayso ay reer Puntland isugu yimaadaan, si looga jawaab celiyo go'aanka Issimada reer SSC-Khaatumo, Puntland-ta cusub siday u ekaanaysana looga wada arinsado,
- In maadaama baarlamaan lifaaq soo saari kara uusan jirin, xukuumad keligeed arinkan ku tagri fali karta ama ka jawaab celin kartana jirin, waxaan soo jeedinaynaa in Maxkamada Dastuurku talo bixin kasoo jeediso arinkan, si doorashada socota, xaalada cusub ee la galay iyo Dastuurka la isku waafajiyo.

Farah M. Aw-Osman

Mudane Farah Aw-Osman

Musharax, Xilka Madaxweyne ee Putland 2024-2029

awosman@gmail.com